

Shahaadada koronaha ee Midowga Yurub (EU)

- Shahaadada koronaha ee Midowga Yurub (EU) waxaa ay ka kooban tahay saddex shahaado: shahaadada tallaalka, shahaadada natiijada baarista koronaha iyo shahaadada caddaynaysa in uu kugu dhacay cudurka feyruska koronaha.
- Cinwaanka kanta.fi ayaad shahaadooyinka si lacag la'aan ah (bilaash ah) uga soo degsan kartaa.
- Shahaadada waxaad ku keydsan kartaa telefoonkaaga ama bogga ayaad sawir ka qaadan kartaa. Sidaas ayay diyaar kuugu tahay shahaadada markaad u baahatid. Sidoo kale warqad ahaan ayaad shahaadada u soo daabacan kartaa.
- Shaqaynta shahaadada tallaalka koronaha ee Midowga Yurub waxey billaabaneysaa 22.6. Shahaadada natiijada baarista koronaha iyo shahaadada in cudurku ku dhacay qofka waxaa laga helayaa bogga internetka ee Omakanta laga billaao 14.7.

Saan ayaad shahaadada uga heleysaa bogga internetka ee Omakanta

1. Gal bogga Omakanta kanta.fi adigoo isticmaalaaya bangiga internetka ama aqoonsiga telefoonka.
2. Dhanka hoose ee bidix ka dalbo "koronatodistus". linkiga laga soo degsan karo shahaadada feyruska korona, waxaad si toos ah uga soo degsan kartaa bogga hore ee Omakanta.
3. Fur shahaadada adiga oo taabanaaya linkiga ay ku qoran tahay "Ava koronarokotustodistus (pdf)" Haddii halkaas ay shahaado kuugu jirto, waxaa kuu furmaaya bog cusub, isaga oo ah nooca pdf-ka.

Shahaadada tallaalka korona ee laga helo bogga internetka ee Omakanta

Shahaadada tallaalka koronaha ee Midowga Yurub waxaa la bixiyaa marka la qaato tallaalka ugu horreeya kaddib, waxaana laga heli karaa bogga internetka ee Omakanta ugu dambeyn shan maalmood tallaalka kaddib.

Haddii shahaadadaada tallaalka aad u baahan tahay, islamarkaana aysan ku jirin bogga internetka ee Omakanta, la xirii qaybta daryeelka caafimaadka ee aad tallaalka ka qaadatay.

Shahaadada koronaha ee Midowga Yurub waxay beddelaysaa oo uu galayaa booska shahaadada qarameed ee laga bixiyo waddankaaga.

Isticmaalka shahaadada koronaha ee waddamada Midowga Yurub

Shahaadada koronaha waxaad isticmaali kartaa markaad ka gudbayso xadadka waddamada Midowga Yurub. Waddamada Midowga Yurub (EU) ayaa iskood go'aan uga gaaraaya ujeedooyinka kale ee muhiimka ah ee isticmaalka shahaadadaas.

Waddamada Midowga Yurub wakhtiyo kala duwan ayay bilaabaya isticmaalka shahaadada koronaha. Qofka musaafirka ah isaga ayaa laga rabaa in uu ogaado waddankuu u safraayo shahaado nooc ah ayaa laga rabaa.

Waddamada saacado kala duwan ayay bilaabaayaan hirgelinta shahaadada. Qofka safraaya ayaa laga rabaa in uu hubiyo shahaadooyinka laga rabo marka uu waddan kale u safraayo.

Tilmaanbixinno iyo macluumaad kale oo dheeraad ah waxaad ka heleysaa kanta.fi/koronatodistus

- Telefoonkeenna adeegga ee macaamiisha waxaa uu shaqaynayaa maalmaha shaqada, saacadda 9–16, telefoonka lambarkiisu yahay 020 634 4588
- iimeylka: asiakaspalvelu@kanta.fi